

# Cudurka xiiq-dheerta (xiiqdheer)

**Waa maxay?** Cudurka xiiq-dheerta waxaa sababa bakteeriya wuxuuna bilaabmaa inta u dhaxaysa 5-21 maalmood kadib marka uu qofku u bayla noqdo. Marka hore, wuxuu u ekaan karaa hargabka oo kale. Kadibna qufaca wuxuu noqon karaa mid aad u daran. Jirrada waxay socon kartaa toddobaadyo badan. Astaamaha qaar ee cudurka waa:



San diif ka socda



Qufac sii xumaanaya



Matagida qufaca kadib



Neefsashada oo dhib ah



Dareemista daal badan

## Sidee ayuu cudurka ku faafaa?

Wuxuu ku faafi karaa qof u gudbiya qof kale iyadoo la isku marsiinayo hawada. Tani waxay dhacdaa marka qof qaba cudurka xiiq-dheerta uu hadlo, qufaco, ama ku hindhiso agagaarka dadka kale.



## Yaa halis ku jira?

Cudurku wuxuu aad ugu daran yahay dhallaanka. Wuxuu u horseedi karaa isbitaal-dhigid, oof-wareen, dhibaatooyin xagga neefsashada ah, dhaawac maskaxda ah, ama xitaa dhimasho.



## Sidee ayaan uga fogaan karaa in aan ku faafiyo dadka kale markaan la jiranahay cudurka?



Gacmaha ku dhaq saabuun iyo biyo



Xiro maaskaro



Qufaca ku dabool xusul ama tiishuu



Guriga joog oo ka fogow dadka kale



Iska ilaali inaad u dhawaato dhallaanka iyo dadka uurka leh

## Tallaalida waa habka ugu wanaagsan ee looga hortagi karo xiiqdheerta.




- Tallaalka loogu talagalay dhallaanka iyo carruurta yaryar waxaa loo yaqaanaa DTaP.
- Tallaalka loogu talagalay dhalinyarada iyo dadka waaweyn waxaa loo yaqaanaa Tdap.
- Dadka uurka leh waa inay qaataan tallaalka inta lagu jiro saddexda bilood ee ugu dambeeya ee uur kasta.



Daryeel-bixiyahaaga caafimaad kala hadal wixii ku saabsan tallaalka, haddii aad xanuunsan tahay, ama aad u bayla noqotay xiiqdheerta. Ku daawaynta antibiyootiga ayaa waxtarta, gaar ahaan marka xilli hore la bixiyo. Si aad wax badan uga ogaato booqo [kingcounty.gov/cd](https://www.kingcounty.gov/cd).

## Tallaalku wuxuu dadka ka difaacayaa cudurka xiiqdheerta.

Dadka da'a kasta ha jiraane waxay u baahan yihiin tallaallada xiiq-dheerta (cudurka xiiq-dheerta) si ay naftooda iyo dadka kaleba u difaacaan. Hoos ka hubi si aad u aragto tallaalka aad u baahan tahay iyo goorta aad u baahan tahay.



| Yaa u baahan in la tallaalo?           | Dhallaanka iyo carruurta yaryar                | Dhalinyerada | Dadka uurka leh                 | Dadka waaweyn 19+                                    |
|--|--|--------------|---------------------------------|--|
| Tallaalkee?                            | DTaP   | Tdap         | Tdap                            | Tdap   |
| Goorma ayay tahay inaan is-tallaalo?   | 2, 4, iyo 6 bilood<br>15-18 bilood<br>4-6 sano | 11-12 sano   | Saddexda bilood ee ugu dambaysa | Waqti kasta ee dadka aanan waligood qaadan tallaalka |
| Immisa tallaal ayay tahay inaan qaato? | 5  | 1            | 1 tallaal uur kasta             | 1, ka dibna mid kale 10kii sanaba mar                |



### Sidee ayuu tallaalku u ilaaliyaa ilmahayga xilliga uurka?

Markii lagu tallaalo, jirkaaga wuxuu samaysanayaa unugyada difaaca jirka oo u gudbaya ilmahaaga. Unugyadaan difaaca jirka ayaa ilaaliya dhallaankaaga bilaha ugu horreeya ee noloshooda. Dadka uurka leh waa in la tallaalaa horraanta saddexda bilood ee ugu dambeeya ee uur kasta.



### Sidee ugu fiican ayuu tallaalku u shaqeeyaa?

Marka si buuxda lagu tallaalo, aad ayay u yar tahay fursada ah inuu kugu dhaco cudurka xiiqdheerta. Si kastaba ha ahaatee, difaaca ayaa daciifaya waqti ka dib. Warka wanaagsan ayaa ah:

- Haddii lagu tallaalo oo aad weli xanuunsato, badanaa waxay noqonaysaa jirro fudud.
- Tallaalka la bixiyo inta lagu jiro uurka waxa uu ilmaha dhowaan dhashay ka ilaaliyaa in uu bukoodo ama uu qaado xanuun daran. Cudurka xiiqdheerta wuxuu dhimasho u sababi karaa dhallaanka.



Bixiyaha daryeelkaaga caafimaadka kala hadal qaadashada tallaalka. Booqo [kingcounty.gov/findaclinic](http://kingcounty.gov/findaclinic) si aad u hesho xulashooyinka tallaalka qaadashada ee kuu dhow.